



SO

Faraha la iska qaado iyo eurodac

©iStockphoto / Janp013

Warbixinta muwaadiniinta wadan sadexaad ama dadka aan waddan lahayn ee la xiray markii lala xiriiriyay iyagoo xuduudaha u gudbaya si aan toosnayn, sida uu qabo qodabka 29(3) ee xeerka (eu) lambarkiisu yahay 603/2013

Haddii aad tahay 14 sano jir iyo kawayn oo markaas lagu xidhay inaad si aan caadi ahayn u goynaysay xuduudda, faraha ayaa lagaa qaadi doonaa waxaana loo gudbin doonaa kaydka xogta faraha ee la dhaho "Eurodac" habkan waa inaad wada shaqayn ka gaysataa – sharciga ayaa kugu waajib yeelay in faraha lagaa sawiro.

Haddii farahaagu ay si cad u muuqan waayaan, oo ay ku jirto inaad si kas ah farahaaga dhaawac u gaarsiisay si aysan usoo bixin, mustaqbalka ayaa faraha lagaa qaadi doonaa.

Haddii aad markale mustaqbalka meel kale ka dalbato magangalyo markale ayaa faraha lagaa qaadi doonaa. Haddii aad magangalyo ka dalbato wadan ka duwan kan markii hore faraha lagaaga qaaday, waxaa dib laguugu celin karaa wadankii faraha lagaaga qaaday.

Xogta farahaaga waxaa la kaydin doonaa 18 bilood – 18 bilood kadib, si otomaatig ah ayaa looga tirtiri doonaa kaydka xogta. Sawirka farahaaga oo kaliya iyo jinsigaaga ayaa waxaa lagu kaydin doonaa Eurodac – magacaaga, sawirkaaga, taariikhdaada dhalasho iyo asalkaaga looma diri doono kaydka xogta ama lama kaydin doono.

Waxaad wakhti kasta mustaqbalka codsan kartaa inaad hesho warbixinta xogta adiga kula xiriirta ee lagu kaydiyay Eurodac oo aad ka hesho wadanka faraha kaa qaaday. Waxaad wadyiisan kartaa in xogtaas la saxo ama la masaxo – waa in la tirtiraa, tusaale ahaan, haddii aad muwaadin ka noqoto EU ama wadan la xiriira ama haddii aad ka hesho ogalaansho daganaansho mid ka mid ah wadamadan oo aadan magangalyo ka dalban.

Eurodac waxaa ku shaqeeya Haayadda Midowga Yurub ee la dhaho eu-LISA. Xogtaada waxaa kali ah oo loo siticmaali karaa ujeedooyinka uu sharcigu qeexay. Waxaa xogtaada heli kara oo kaliya Sistemka Dhexe ee Eurodac. Haddii aad mustaqbalka magangalyo ka codsato wadan kale oo EU la xiriira¹⁾, farahaaga waxaa loo diri doonaa wadankaas si loo xaqiijiyo. Xogta lagu kaydiyo Eurodac lalama wadaagi doono wadan kale ama urur ka baxsan EU iyo wadamada la xiriira.

1) **Xogta farahaaga waxaa lala wadaagi karaa cidda uu sharcigu u ogalaado ee u dhexaysa 28ka wadan ee Wadamada Xubnaha ka ah EU oo lagu daray 4ta Wadan ee La Xiriirta – Noorwey, Ayslaandhi, Iswiisarlaandhi, iyo Lijtenistiin.**

Marka la gaaro 20ka Julaay 2015, farahaaga waxaa baadhi kara maamulada sida booliska iyo xafiiska booliska Yurub (Europol) kuwaas oo codsan kara inay galaangal u yeeshaan kaydka xogta Eurodac iyada oo ay ujeedadu tahay ka hortagidda, dareemidda iyo baadhista danbiyada khatarta ah iyo argagixisada.

©Midowga Yurub 2014

Dib usoosaaridda waa la ogalyahay. Wixii isticmaalid ah ama dib usoo saarid sawirada shakhsiga ah, waa in ogalaansho laga dalbadaa cidda tooska u leh xuquuqda daabacaadda.

Warbixinta xiriirada

Aqoonsiga Hayaha Eurodac iyo wakiilkiisa/keeda

Baraha lala xidhiidhayo: Guddida Bilayska Qaranka (Poliisihallitus) iyo Adeegga Socdaalka Fiinland (Maahanmuuttovirasto)

Tafaasiisha la-xidhiidhka xafiiska hayaha

+ 358 295 480 181
Poliisihallitus (Guddida Bilayska Qaranka)
PL 22, 00521 Helsinki
kirjaamo.poliisihallitus@poliisi.fi

Maahanmuuttovirasto (Adeegga Socdaalka Fiinland)
PL 18, 00581 Helsinki
+358 295 419 600
Lambarka adeegga arrinkan:
+358 295 419 627,
Salaasa–Khamiis 10–11
www.migri.fi

Haddii aad rabto inaad aragto xog kula xidhiidha taasi oo lagu diiwaangaliyey nidaamka Eurodac, u gudbi codsi saldhigga bilayska adiga oo adigu qaadaya. U diyaargarow inaad tusto xoogaa caddayn aqoonsi ah. Waxaanu kugula tali-naynaa inaad la xidhiidho barta adeegga bilayska ee aqbashay dalabkaaga magangalyo-doonka. Macluumaadka la-xidhiidhka

baraha adeegga bilayska waxa laga heli karaa websaytka Bilayska oo ah poliisi.fi.

Tafaasiisha La-xidhiidhka Hay'adda Kormeerka Qaranka (Ilaalinta Xogta)

Tietosuojavaltuutetun toimisto (Xafiska Baadhaha Ilaalinta Xogta)
PL 800, 00521 Helsinki
+ 358 295 666 700
Adeegga macluumaadka:
+358 295 616 670,
Isniin–Khamiis 9–11 iyo 13–15,
Jimce 9–12
tietosuoja@om.fi
www.tietosuoja.fi



Rajavartiolaitos
Gränsbevakningsväsendet
The Finnish Border Guard